



enterprises, inc.

2021 HAGAHAXEERKA DHAQANKA

Guddida U hogaansanka ee Shirkada —ApogeeCompliance@apog.com
Waaxda Sharciga Apogee—ApogeeLegal@apog.com

KA WARBIXINTA IYO BAADHITAANKA XAD GUDUBYADA

Xaga Apogee, waxaanu qabanaa ganacsi darajada u gu saraysa ee daacadnimada iyo dhaqanka anshaxa. Intaa ka sakow, sharciyada iyo xeerarka gudaha Maraykanka iyo wadamada dibada si isa soo taraysa waxay ugu baahan yihiin shirkado ka warhaya tallaabooyinkooda si loo xaqiijiyo u hogaansanka sharciyada iyo shuruucda ku habboon. Si looga caawiyo shaqaalahu inay fahmaan waxa laga filayo iyaga, Shirkadu waxay samaysay Barnaamijka U hogaansanka Shirkada oo dhan ee hagahan ka kooban yahay; Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, ee dejiya Shirkada mabaadi’deeda anshaxa hagida iyo heerarka dhaqanka ganacsigeeda, iyo Xeerarka Shirkada, oo sameeya xeerarka u hogaansanka gaarka ah ee shaqaalaha ay raacayaan.

Shaqaaale kasta waxa uu ka masuul yahay u hogaansanka sharciyada dhammaantood, heerarka iyo mabaadi’da ama tixraacida Barnaamijka U hogaansanka Apogee, Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, iyo Xeerarka Shirkada. Xeerarka Shirkada waxay ku habboon yihiin shaqaale kasta oo Shirkada ah, ay ku jiraan shaqaalaha Apogee iyo shaqaalaha farac kasta oo Apogee ah, qayb ganacsi ama xarun, laga reebo ilaa xadka khilaafka Xeerarka Shirkada ee shuruuda ku habboon gorgortan heshiis wadareed ama waajib kale oo Shirkada ah oo waafaqsan sharciga ku habboon.

Xad gudubyada sharciga, Barnaamijka U hogaansanka ama Xeerar kale oo Shirkada ah, nidaamyada, tilmaamaha, sharciyada shaqada, dhaqamada ama waxa la mid ah waxay keeni karaan tallaabo ansax, ay ku jirto eryid. Ma jiro wax ka kooban Hagahan, Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, Xeerarka Shirkada ama wada xidhiidhka barnaamijka u hogaansan, waxay sameeyaan ama tilmaamaan qandraska shaqada.

Si looga caawiyo shaqaalahu inay fahmaan sharciyada iyo shuruucda saameeya Shirkada, inta kooban ee soo socota ee Xeerarka Shirkada ah ayaa la sameeyay. Koobiyada Xeerka Anshaxa ganacsiga Apogee iyo Dhaqanka, ay ku jiraan koobiyada luqaddaha aan ahayn Igeriisi, waxay ku yaalaan websaydka www.apog.com/corporate-governance/governance-overview. Xeerarka Shirkada iyo Xeerarka kale ee Shirkada sidoo kale waxaa loo heli karaa shaqaalahu si ay dib ugu eegaan. Inta kooban ee soo socda waxba kama tidhaahdo xaalad kasta oo suuragal ah, iyo xaalada aan lagu tixraacin xogta kooban ee soo socota waxa dhici karta inay abuurto ama aanay abuurin xad gudub suuragal ah inuu dhaco. Haddii aad qabto su’aalo, la xidhiidh kormeerahaaga, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, La taliyaha Guud ee Apogee, ama Guddida U hogaansanka sida lagu bixiyay qabta “Ka warbixinta iyo baadhitaank Xad gudubka.”

Xusuuso Apogee adiga ayay isku kaa halaynaysaa si aad uga caawiso ballan qaadyada joogta ah ee u hogaansanka mabaadi’dayada ansahaxa, sharciga, iyo dhaqamada xisaabaadka iyo hanti dhowrka saxda ah.

Haddii aad rumaysan tahay qof inuu ku xad gudbayo sharciga, mabaadi’da ama heerarka ay ku jirto hagahan, Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka ama aad walaac qabto ku saabsan xisaabaad wax la iska waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka warbixiso xad gudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ama walacyadaada.

Waxaad ka warbixin kartaa xad gudubyada ama walaacyada kormeerahaaga, maareeye sare, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, La taliyaha Guud ee Apogee lambarka 952.487.7645 ama ApogeeLegal@apog.com, ama Guddida U hogaansanka iimaylka ApogeeCompliance@apog.com. Waxaad sidoo kale uga warbixin karaa addoo la xidhiidhaya Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee

www.apog.ethicspoint.com.

Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee waxaa ka ka hawl gala iibiya dibada ah oo aan ku xidhnayn Apogee.

Fadlan arag tilmaamaha ku saabsan sida loo sameeyo wicitaanka bilaashka ah ee Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee ee boggaga 6 iyo 7 ee Hagahan.

Warbixin kasta oo la yaqaano ama looga shakisan yahay xad gudubka sharciga ama Barnaamijka U hogaansanka ama xisaabaadka la is waydiyo ama dhaqamada hanti dhowrida si degdeg oo dhammaystiran ayaa loo baadhi doonaa. Ma jirto tallaabo aargoosi oo laga qaadi doono mar labbaad qof kasta inuu warbixin daacad ah sheegay oo ah xad gudub la og yahay ama laga shakisan yahay.

KHADKA TOOSKA AH EE XEERKA DHAQANKA APOGEE

www.apog.ethicspoint.com (Geli magaca ururka “Apogee”) (adduunka oo dhan) ama 800.441.6164 (wicitaanka bilaashka ah gudaha Maraykanka iyo Canada). Fadlan eeg tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka bilaashka ah ee wadamada ka baxsan Maraykanka iyo Canada ee boggaga 6 iyo 7 ee Hagahan ama xaga www.apog.ethicspoint.com (ama geli magaca ururka “Apogee”).

XEERKA DHAQANKA

XEERKA SHIRKADA	XEERKA OO KOOBAN	KU BARAARUG
Sharciyada Xaq ka dhigida ganacsiga iyo Dhaqamada Tartar wanaaga	Shirkada waxaa ka mamnuuca ah inay heshiis la gasho ama fahanka tartamayaasheeda waxa khuseeya qiimayaasha alaabta ama adeegyada, lacag dhimista, xaaladaha kale ee iibka, macaashka ama xadadka macaashka, kharashyada, qoondaynta dhulalka ama macaamiisha, ama qandaraasyada. Shirkadu sidoo kale kama xanibi karto dib u iibiyayaasha ama qaybiyayaasha xoriyada ay dib ugu iibiyaan alaabta shirkada.	La falan qaynta tartamayaasha qiimaha, xeeladaha qiimaha, suuq gaynta, alaabta aan lagu dhawaaqin iyo adeegyada, dakhliyada iyo kharashyada ama macluumaadka Shirkadu leedahay.
Sharciga Ku lidka ah Qaadacaada iyo Shuruucda	Shirkadu ma samayn karto shayna si ay ugu hogaansanto ama u taageerto qaadacaada ganacsiga wadan aanay taageerin dowladda Maraykanku.	Ka jawaabida in la qaadacado codsiga. Codsiga si loo taageero qaadacaada Carabta ay qaadacdo Israa'iil.
Khilaafka Danta	Shaqaalaha waa inay iska ilaaliyaan xaaladaha iyo hawalaha halka dantooda gaarka ah ay ka hor imanayso, ama si macquul ay ugu muuqato khilaafka, dadnka Shirkada. Shaqaale gaar ah waxaa looga baahan doonaa inay dhammaystiraan Su'aalaha xog ururinta Khilaafka Danta.	Helida hadiyado xad dhaaf ah, muraad siinta ama maaweelada ka timid shirkada hadda ama mustaqblka ama macmiilka. Lahaanshaha danta dhaqaale ee qofka kula tartamaya.
Hadiyadaha iyo Lacagaha la isa siiyo	Shaqaalahu ma siin karaan ama ma aqbali karaan wax hadiyad ah ama lacag la isa siiyo ah ama ka timid qof ama shirkad raadinaysa inay ganacsi la samayso Shirkada, oo la xidhiidha wax kala iibsiga ku lugta leh Shirkada. Hadiyadaha iyo Lacagaha la isa siiyo aan ku xidhnayn wax kala iibsiga waa la aqbali karaa haddii ay qiimo caadi ah leeyihiin aanay ka ba badnayn lacagaha caaddo ahaan la isa siiyo.	Hadiyadaha iyo Lacagaha la isa siiyo oo leh in ka badan qiimaha caadiga ah ee shaqaalaha, ama uu ka aqbalo shaqaalaha, shirkada, macmiilka, qaybiyaha ama la taliyaha. Siint alacag, ama aqbalaada lacag caddaan ah ama wax lacag cadaan ah u dhigma oo ka timid, shirkada, macmiilka, qaybiyaha ama la taliyaha iyaddoo loo eegin qadarka ay leegtahay.
Xidhiidhaha Dowladda - La macaamilka Saraaskiishka Dad waynaha iyo Shaqaalaha.	Lacag bixinta hadiyadaha, cuntooyinka iyo lacagaha la isa siiyo ee kale ee loola jeedo saamayn ku yeelashada sarkaalka kasta oo dad wayne ama shaqaale waa mamnuuc., Waxay siisaa shaqaalaha saraakiisha dad waynaha ama shaqaalaha waa inay oggolaataa mar hore Gollaha Guud ee Apogee. Shaqaalahu waa inaanay been sheeg ama si xun u metelin runta marka ay la xidhiidhaayan saraakiisha ama shaqaalaha.	Lacag bixinta caddaanka ah, lacagaha la isa siiyo, maaweelada saraakiisha dad waynaha ama shaqaalaha. Shaqaalaynta iyadda oo uu codsado sarkaalka dad waynaha ama shaqaale. Si xun u metelka ama ama ku guul daraysiga si loogu daro macluumaadka muhiimka ah ee wada xidhiidhka lala leeyahay saraakiisha dad waynaha ama shaqaalaha.
Qandaraasyada Dowladda	U hogaansanka adaga ee sharciga iyo shuruucda ku habboon qandaraasyada dowladdu waa ku khasab shaqaale kasta.	Hadiyadaha ama bakhshiiska si qandaraas looga qaato saraakiisha. Ka hadalka fursadaha shaqada ee mustaqblaka xaga Shirkada leh saraakiisha qandaraaska. Aan raacin nidaamyada qandaraaska xisaabadka ama shuruudaha qandasaaska.

XEERKA DHAQANKA

XEERKA SHIRKADA	XEERKA OO KOOBAN	KU BARAARUG
Baadhitaanka dowladda iyo waraysiyada	Dhammaan codsiyada dowlada ee waraysiga ama dhokumentiyada isla markaab waa in looga warbixiyaa Gollaha Guud ee Apogee. Shaqaalaha ka qayb galaya dowladda, waraysiyada waa inay bixiyaan jawaabo sax ah oo dhammaystiran.	Warqadda waaranka raadinta, yeedhmada maxkamadda, codsiyada baadhayaasha dowladda ama sharci yaqaanada ee macluumaadka ku saabsan Shirkada ama shirkadaha shirkadu ganacsiga la samayso.
Wax kala iibsiga Caalamiga ah iyo Hawl galada.	Shirkadu waxay u hogaansami doontaa dhammaan sharciyada iyo shuruudaha ku habboon wax kala iibsiga caalamiga ah ka sakow u hogaansanka sharciyada Maraykanka ee ku habboon.	Ku guul draysiga u hogaansanka shuruudaha soo dejinta, dhoofinta, sarifka lacagta, ama cashuurta ee wadamada ajnabiga ah ama maamulka dhoofinta, cuna qabataynta ganacsiga ama sharciyad aku lidka ah qaadacaada Maraykanka.
Xeerka Dhaqanada Musuqmaasuqa Ajbaniga	Lacag bixinta aan saxda ahayn ama hadiyada gudaha wadamada ajnabiga ah ee la siiyo saraakiiska dowladda, siyaasiyiinta ama kooxaha siyaasada waa mamnuuc.	Lacag bixinta la is waydiiyo, khidmadaha, hadiyadaha ama lacag bixinta cadaanka ah ee la siiyo saraakiisha dowladda, siyaasiyiinta ama kooxaha siyaasada. Hawalaha gudaha wadanka lagu yaqaano laaluushka. Khidmado si aan caadi ahayn u wayn ama yar, gunnooyinka ama lacag celinta.
Laaluushka iyo Lacagta sharci dara ah	Laaluushka iyo lacagta sharci dara ah waa mamnuuc.	Lacag bixinta la is waydiiyo, khidmadaha iyo qaban qaabooyinka la talinta, ama hadiyada joogta ah ama xad dhaafka ah.
Hawlaha Siyaasadeed ama Cadaadis saarida	Shirkadu waxay u hogaansami doontaa dhammaan shirkada ku saabsan ka qayb galka siyaasadeed iyo cadaadis u saarida.	Ka qayb galka siyaasada ee ka timid maaliyada Shirkada. Magdhowga Shirkada ee ka qayb galka siyaasadeed.
Ilaalinta Hantida Shirkada iyo Macluuumadka	Macluumaadka uu ka kooban yahay diwaanada Shirkada ama ay samaysay Shirkadu waa hantida Shirkada. Hantida garaadka iyo macluumaadka iyo maaliyada Shirkada iyo hantida waa in si ku filan oo amni ah loo ilaaliyaa si looga hortago xatooyada, burburinta ama shaacinta aan la oggolayn ama isticmaalka.	Isticmaalka aan la oggolaan ama shaacinta lahaanshaha macluumaadka, qoraalada xuquuqda lahaanshaha loo sameeyay ama sooftiweerka kombuyuutarka Shirkada. Isticmaalka aan saxda ahayn ee maaliyada Shirkada. Isticmaalka gaarka ah ee hantida Shirkada.
Fursada Shaqada Loo siman yahay	Shirkadu waxay bixin doontaa fursad shaqo oo loo siman yahay iyaddoo loo eegin isirka, midabka, caqiidada, diinta tafiirta, sinjiga, da'da, asalka qaranka, qaabka galmada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, iyo/ama caddaynta jinsiga, naafanimada, xaalada caafimaadka, taariikhda caafimaadka qoyska ama macluumaadka hidda sidaha, uurka, heerka lammaanaha guriga ama guurka, heerka xaaska, heerka la xidhiidha caawimada dad waynaha, heerka muwaadinimada, ciidanka ama ciidankii hore, ama ama dabaqada heerka kale oo la ilaaliyo.	Tallaabooyinka la qaado ee ku lidka ah shaqaalaha qaabka ku salaysan isirka, midabka, caqiidada, diinta tafiirta, sinjiga, da'da, asalka qaranka, qaabka galmada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, iyo/ama caddaynta jinsiga, naafanimada, xaalada caafimaadka, taariikhda caafimaadka qoyska ama macluumaadka hidda sidaha, uurka, heerka lammaanaha guriga ama guurka, heerka xaaska, heerka la xidhiidha caawimada dad waynaha, heerka muwaadinimada, ciidanka ama ciidankii hore, ama ama dabaqada heerka kale oo la ilaaliyo.

XEERKA DHAQANKA

XEERKA SHIRKADA	XEERKA OO KOOBAN	KU BARAARUG
Dhibaataaynta	Dhibaataaynta galmada iyo dhibaataaynta ku salaysan isirka, midabka, caqiidada, diinta tafiirta, sinjiga, da'da, asalka qaranka, qaabka galmada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, iyo/ama caddaynta jinsiga, naafanimada, xaalada caafimaadka, taariikhda caafimaadka qoyska ama macluumaadka hidda sidaha, uurka, heerka lammaanaha guriga ama guurka, heerka xaaska, heerka la xidhiidha caawimada dad waynaha, heerka muwaadinimada, ciidanka ama ciidankii hore, ama ama dabaqada heerka kale oo la ilaaliyo lama aqbali karo oo looma dul qaadan karo.	Taabashada jidhka ah ee aan la soo dhawayn, faallooyinka galmada ama tilmaanta ah ama kaftanka, ishaarooyinka galmada, khaniiska, labba sinjiile, khaniisad ama faallooyinka ku saabsan qofka sinjigiisa beddelay ama kaftanka. Dhibaataaynta ku salaysan heerarka ilaashan ee kale ee habboon. Khataraha ama tilmaamaha ee yeelida shaqaalaha, ama diidista ku soo dhawaanshaha galmada, ay saamayn doonto xaaladahiisa shaqada ama teeda.
Sharciyada Deegaanka iyo Shuruuca	Shirkadu waxay u hogaansanmi doontaa sharciyada deegaanka iyo shuruuca.	Diiwaan haynta deegaanka aan dhammayska tiranayn. Daadashada aan laga warbixin ama sii daynta. Qashin daadiska aan saxda ahayn. Isticmaal qalabka jiidista aan la oggolayn ama goobta xashiishka.
Ganacsi ka Samaynta Gudaha iyo Wax u sheegid aiyo Xadidka	Ma jiro shaqaale iibsana kara ama iibin kara saamiyada Apogee marka la haysto qoraalka macluumaadka aan dad waynaha loogu talo gelin ama "war yar" qoraal macluumaad aan dad waynaha loogu talo galin ee kuwa kale ee iibsana kara ama iibin mara saamiyada Apogee. Ma jiro shaqaale ka qayb qaadanaya yaraynta dhaqdhaqaaqa maaliyada ee la xidhiidha saamiyada Apogee.	Ka gacnsiga, ama uga waranka macluumaad kuwa kale, ku salaysan macluumaad aan dad waynaha loogu talo gelin. Ka ganacsiga saamiyada shirkad kale oo guud taas oo Apogee ay la leedahay wax kala iibsi suuragal ah. Iibsashada ama iibinta qandaraasyada hore, ku beddelka lacagta socota, iibsiga iyo iibsashada iyo isku beddelka maaliyada loogu talo galay inay xadido ama yaraynta dheeli tirka qiimaha suuqa ee saamiyada Apogee.
Buuggaagta iyo Diiwaanada Saxda ah	Shirkada warbixinaheeda dhaqaalaha, buuggaagta, diiwaandda iyo dhokumentiga loo gudbiyay kooxo kale waa inay sax ahaadaan oo dhammaystirnaadaan, oo waa in loo diyaariyo si waafaqsan guud ahaan mabaadi'da xisaabaadka la aqbali karo iyo qaabka ay caddaysay Shirkadu.	Diiwaanada beenta ah, marani habaabinta ah ama laga saaray. Ku guul daraysiga in la raaco nidaamyada xisaabaadka saxda ah, ama isticmaalka akoonada ka baxsan buugga, Ka saarida diiwaanada shirkada ama xaqiiqooyinka qalabka ama macluumaadka uu sharcigu u baahan yahay ama lama huraanka ah in la sameeyo diiwaano aan marin haabis ahayn.
Xogtaogta Korontada iyo Wada xidhiidhka	Dhammaan wada xidhiidhka koronta iyo qalaka codka iyo nidaamyada waxaa leh oo lagu hayaa dhaqanka ganacsiga Shirkada. Shirkada waxaa u dhowran xaqa ay dib ugu eegto oo uga warhayso isticmaalka nidaamyada iyo macluumaadka wada xidhiidhka gaarka ah iyo faylasha.	Isticmaalka nidaamyada Shirkada si loo galo, loo diro ama loo helo qoraalka dhibaataada leh, sharci daro ah, galmo cad ama anshax xumo tilmaan leh. Isticmaalka gaarka ah ee xad dhaafka ah.
U shaacinta Macluumaadka Dad waynaha, Saxaafada iyo Falan qeeyayaasha	Shaacinta ku saabsan macluumaadka ku saabsan Shirkada waa in keliya lagu sameeyaa dhexda af hayeenada gaar ahaan la oggolaada ama la magacaabay.	Shaacinta macluumaad been ama marin habaabis ah oo saxaafada lagu shaaciyay ama warbixinaha loo gudbiyay dowladda ama masuuliyiinta sharciga, ama macluumaadka Shirkada ee qarsoodiga ka ah dad waynaha. Shaqaalaha aan loo oggolayn ama loo magacaabin sidii af hayeenada la hadlaya saxaafada ama falan qeeyayaal metelaya Shirkada.

XEERKA DHAQANKA

XEERKA SHIRKADA	XEERKA OO KOOBAN	KU BARAARUG
Anshaxa Shaqaalaha iyo Ka joojinta Shaqada	Shirkada waxaa u dhowran xaqa ay ku anshax mariso ama kaga joojiso shaqaale kasta shaqada oo ay go'aan ku gaadho anshaxa gaarka ah in la saaro xaalad kasta oo la sheego.	Isku dayada si loo xadido anshaxa ay soo rogayso Shirkadu.
Ka dhiidhiyaha Xaq darada Aar goosiga ku lidka ah	Shaqaalaha uga warbixiya si daacad ah xad gudubyada sharciga laga shakisan yahay, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada ama kuwa ka warbixiya walaacyada ku saabsan xisaabaadka la is waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrka lagama daba iman doono ama lagama aar goosan doono. Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay inay ka warbixiyaan xad gudubyo kasta oo sharci oo la og yahay ama laga shakisan yahay, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada.	Hanjabaado kasta ama baqdin gelinta shaqaalaha ka warbixiya xad gudub kasta oo laga shakisan yahay ama dhab ah sharci kasta, sharciga, xeerka badbaadada ama Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada ama walaacyada ku saabsan xisaabaadka la is waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida.
Hirgelinta Barnaamijka U hogaansanka iyo Turjumaada	Guddida u hogaansanka waxay ka masuul tahay ka warhaynta iyo hirgelinta Barnaamijka U hogaansanka Apogee.	Dedaalada in la iska dhaafto ama "laga wareego" sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada.
Barnaamijka U hogaansanka Hanti dhowrka iyo Ka warhaynta	Shaqaalaha waa inay raacaan Xeerarka Shirkada, ka warbixiyaan xad gudubyada iyo ka wada shaqeeyaan dedaalada Shirkada si loo soo urursho macluumaad ku saabsan u hogaansanka.	Codsiga in "la iska dhaafto" ama "la iska ilaawo" marka sharciga, xeerka, badbaadada, u hogaansanka, xisaabaadka ama walaacyada hanti dhowrka la soo qaado. Ku guul daraysiga in laga warbixiyo xad gudubka sharci kasta, sharciga, xeerka badbaadada ama Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada ama walaacyada ku saabsan xisaabaadka la is waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida.
Anshaxah Barnaamijka U hogaansanka	Shaqaalaha ku xad gudubka sharciga Barnaamijka u Hogaansanka ama Xeerarka Shirkada waxaa la marin doonaa tallaabo anshax ah.	Ku guul daraysiga in la anshax mariyo shaqaalaha ku xad gudubka sharciga ama Barnaamijka U hogaansanka.
Barnaamijka Waxbarashadda u Hogaansanka iyo Caddaynta	Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay si muddaysan inay dib ugu eegaan Hagaha Barnaamijka U hogaansanka, caddeeyaan fahankooda masuuliyada si ay u raacaan warqaddaha iyo ruuxda Barnaamijka U hogaansanka Apogee oo uga qayb galaan tababarka u hogaansanka.	Ku guul daraysiga inay caddeeyaan u hogaansanka Barnaamijka U hogaansanka Apogee. Ku guul daraysiga in laga qayb galo tababarka u hogaansanka.
Ka warbixinta iyo baadhitaanka Xad gudubyada	Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay si degdeg ah inay ka warbixiyaan xad gudubyo kasta oo sharci ku habboon oo la og yahay ama laga shakisan yahay, Barnaamijka U hogaansanka Apogee iyo Xeerarka Shirkada.	Waa in looga warbixiyo si daacad ah. Shakhsiyaadka ku habboon si degdeg ah waxaa loo magacaabay inay baadhaan. Warbixinaha waxaa loo samayn doonaa iyaddoo magaca la qarinayo.

MASUULIYADAADA U HOGAANSANKA

Dhammaan shaqaalaha Apogee iyo farax kasta oo toos ah ama aan toos ahayn Apogee, qayb, qayb suuq, qayb ganacsi ama goob waxaa laga filayaa inay raacaan sharciyada ku habboon, shuruucda, sharciyada iyo xeerarka amarada. **Waxaad ka masuul tajay helida aqoonta ku habboon shuruudaha la xidhiidha waajibadyadaada si ay awood kuugu siiso adigu inaad aqoonsato arrimaha u hogaansanka iman kara.** Uma cudur daari karti fal sharci daro ama aan anshax wanaagsan addoo sheeganaya inaanad garanayn falku inuu khaldanaa.

MAAMULKA MASUULIYADA U HOGAANSANKA

Dhammaan xubnaha maamulka waxa alooga baahan yahay inay u hogaansamaan Barnaamijka U hogaansanka Apogee iyo Xeerarka Shirkada. Maamulka shirkadu waxa uu ka masuul yahay hubinta inaad hesho macluumaad kugu filan iyo tilmaan si ay awood kuugu siiso adigu inaad fahanto oo u hogaansato shuruudaha sharciga ku habboon iyo anshaxa. Kormeerayasha iyo maareeyayaasha sidoo kale waxay ka masuul yihiin si firfircoon ugu dhiirigelinta shaqaalaha inay ka hadlaan walaacyada, su'aalaha iyo arrimaha la xidhiidha sharciga iyo u hogaansanka anshaxa iyo xisaabadka la is waydiin karo ama arrimaha hanti dhowrka.

QARSOODIGA IYO ILAALINTA KU LIDKA AH AARGOOSIGA IYO KA AARSASHADA.

Ilaa xadka sharciga oggol yahay, Shirkadu waxay qaadi doontaa feejignaanta macquulka ah si loo ilaaliyo qarsoodiga shakhsiyaadkaas ka warbixiya xad gudubyada laga shakisan yahay ama la og yahay ee sharciga, Barnaamijka U hogaansanka ama Xeerarka Shirkada ama xisaabaadka la is waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida iyo qarsoodiga ee qofka ku saabsan warbixinta laga samaynayo. Waa lama huraan in dhaqaalaha ku lugta leh baadhitaanka ama ka warbixiyay ay sharfaan ballan qaadkan qarsoodiga ah. Si buuxda waa uga mamnuuc shaqaale kasta inuu ciqaabo ama ka aarsado ama ka aargoosta shaqaale kale oo si daacad ah uga waramay xad gudubyada ama xisaabadka la is waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida.

ANSHAXA SHAQAALAHAA EE XAD GUDUBYADA

Marka la go'aamiyo inuu shaqaale ka qayb qaatay ku xad gudubka sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada ama ka qayb galay xisaabaad aan sax ahayn ama dhaqamada hanti dhowrida, isaga ama iyadda waxaa la marin doonaa anshax, ilaa iyo ay ku jiraan ka joojinta shaqada. Intaa ka sakow, Shirkada waxaa u dhowran xaqa ay ku bilowdo tallaabo sharci ah oo ku lid ah shaqaalaha wixii ah xad gudubka iyo inay u gudbisoo arrimaha masuuliyiinta sharci ama shuruuc, ee tallaabooyinkooda. Tallaabada anshaxa sidoo kale waxaa laga qaadayaa kormeerayaasha ama hawl fuliyayaasha aqbal, oggolaada ama ku guul daraysta inay ka qaadaan tallaabada ku habboon ee ku lidka ah sharci darrada, anshax darrada ama dhaqanka kale ee aan saxda ahayn. Waa xeerka Shirkada in la mariyo anshaxeeda qaab waafaqsan, si kastaba ah ahaatee, qaabka anshaxa ku habboon waxa uu ahaan doonaa xaalad ahaan mid gaar ah.

KA WARBIXINTA IYO BAADHITAANKA XAD GUDUBYADA

Shirkadu waxay dhiirigelisaa shaqaalheedu inay warbixin daacad ah ka sameeyaan xad gudubyada suuragal ah ama xisaabaadka

la is waydiin karo ama arrimaha hanti dhowrida. Haddii aad rumaysan tahay qof inuu ku xad gudubayo sharciga, mabaad'ida ama heerarka ay ku jirto Hagahan ama xeerkasta oo kale oo Shirkada ku habboon ama aad walaac qabto ku saabsan xisaabaad wax la iska waydiin karo ama dhaqamada hanti dhowrida, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka warbixiso xad gudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ama walacyadaada. Waxaad samayn kartaa warbixinada adoo:

1. La xidhiidhaya kormeerahaaga tooska ah, maareeyaha sare, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, ama La Taliyaha Guud ee Apogee lambarka 952.487.7645.
2. Warqad u qoraya Waaxda Sharciga Apogee ApogeeLegal@apog.com ama Guddida U hogaansanka xaga ApogeeCompliance@apog.com; ama
3. La xidhiidhaya Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee si loo sameeyo warbixin magaca la qarinayo xaga:
 - www.apog.ethicspoint.com (eGeli magaca ururka "Apogee") (adduunka oo dhan).
 - 800.441.6164 (wicitaanka bilaashka ah gudaha Maraykanka iyo Canada).
 - Arag tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka bilaashka ah ee wadanka aan ahayn Maraykanka iyo Canada.
 - Shaqaalaha doonaya inuu warbixin siiyo Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee ee wadan kale oo aan ahayn Maraykanka ama Canada waxa uu ka xidhiidhi karaa Khadka tooska ah ee onlaynka ah xaga www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka "Apogee") wixii ah tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka,

Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee waxaa ka hawl gala iibiya dibada ah oo aan ku xidhnayn Apogee, iyo nidaamku waxa uu oggoladaa warbixinta magaca la qarinayo in la sameeyo.

Haddii aad jeclaan lahayn inaad warbixin ku samayso luqad aan ahayn Ingiriisi, waa inaad soo wacdaa Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee oo aad waydiisataa turjubaan. Warbixin kasta oo la yaqaano ama looga shakisan yahay xad gudubka sharciga ama Barnaamijka U hogaansanka ama xisaabaadka ama walaaca hanti dhowrida si degdeg oo dhammaystiran ayaa loo baadhi doonaa. Haddii uu xad gudub dhacay, Apogee waxay qaadi doontaa tallaabooyin macquul ah si looga hortaggo xad gudubyo la mid ah. Intaa ka sakow, warbixinta xisaabaadka ama walaacyada hanti dhowrida waxaa looga warbixin doontaa Guddida Hanti dhowrka ee Maamulayaasha Guddida Apogee. Xusuuso, ku guul daraysiga in laga warbixiyo ama aqbalaada xad gudubka sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkada waxay keeni karaan tallaabada anshax marinta ilaa iyo ay ku jiraan ka joojinta shaqada.

TILMAAMAHA DHEERAADKA AH EE TELEFOONKA EE WICITAANADA TELEFOONKA LAGA SAMEEYAY WADAN AAN AHAYN MARAYKANKA IYO CANADA.

Haddii aad doonayso inaad u samayso wicitaanka telefoonka Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee addoo jooga wadan kale oo aan ahayn Maraykanka iyo Canada, waxaad u baahan doontaa inaad toos u garaacdo AT&T lambarka goobtaada addoo isticmaalaya layn dibada ah iyo ka dib tilmaanta garaad Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee lambarka telefoonka sida hoos lagu muujiyay,

- Sug tilmaanta oo ka dib garaac 800.441.6164.

WADANKA	AT&T GARAACIDA TOOSKA AHLAMBARKA ACCESS®	LUQADDA-DOOKHYADA
Baraasiil (Aan ka iman Telefoonka Gacanta)	0-800-890-0288	Boortaqiis (Baraasiiliyaan), Ingiriisi
Baraasiil (Ka yimid Telefoonka Gacanta)	0-800-888-8288	
Denmark	800-100-10	Dheeniish-Ingiriisi
Singa buur (StarHub)	800-001-0001	Ma-lay, Ingiriisi
Singa buur (Sing Tel)	800-011-1111	
Ingiriiska (British Telecom)	0-800-89-0011	Ingiriisi



- Wicitaanka waxaa lagaga jawaabi doonaa af Ingiriisi. Si loo sii wado wicitaankaaga luqadda kale, fadlan u sheeg luqaddaada hawl wadeenka telefoonka si loo codsado turjubaan. Waxay qaadan kartaa dhowr daqiiqo turjubaanku inuu soo galo laynka. Ha dhigin telefoonka

Lambarada toos u gelida AT&T caalamiga ah way isbeddeli karaan. Haddii lambarka wicida tooska ah ee sare ku qoran aanu shaqaynayn, fadlan garaac lambarka gelida tooska ah ee beddelka ah ee AT&T ama booqo www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka “Apogee”) liiska ugu badan ee lambarada gelida.

GEBAGEBADA

Shirkadu waxay ku ballan qaadaysaa inay u qabsato hawlaheeda ganacsiga qaab anshax wanaagsan iyo qaab saxan iyo gudaha warqadda iyo ruuxda dhammaan sharciyada iyo xeerarka. Hagahan waxaa loogu talo galay inuu kaa caawiyo inaad si wanaagsan ufahamto sharciya iyo mabaad’da anshaxa iyo sharciga Apogee. Ugu dambayn, si kastaba ha ahaatee waxaa lagaaga tegayaa inaad ku tiirsanaato qiimayntaada gaarka ah inaad go’aan ka gaadho jidka tallaabada saxda ah. Xusuuso had iyo jeer inaad isticmaasho qiimaynta iyo dareenka saxda ah.

